JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند


| *Sannadkii 11aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 26/03/2022* |
|---|---|---|


## WAX-KA-BEDELKA IYO KAABISTA XEERKA MAAMUUSKA MADAXWEYNAHA, MADAXWEYNE KU-XIGEENKA HORE, GUDOOMIYAHA GOLAHA GUURTIDA IYO GUDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADA EE HORE IYO MUDANAYAASHA BAARLAMAANKA

## XEER LR.62/2020


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com


*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2022*

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

RECEIVED
RL: 256
16/01/2021

## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-625/012021 Taar: 02/01/2021

# Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-xigeenka Hore, Guddoomiyaha Golaha Guurtida, Guddoomiyaha Golaha Wakiillada ee Hore iyo Mudaneyaasha Baarlamanka Xeer Lr.62/2020**

**Markaan Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Go'aanka Golaha Wakiillada, Go'aan Lr. GW/KF-44/869/2019, ee ku taariikheysan 09/12/2020, ee ay ku ansixiyeen Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-xigeenka Hore, Guddoomiyaha Golaha Guurtida, Guddoomiyaha Golaha Wakiillada ee Hore iyo Mudaneyaasha Baarlamanka Xeer Lr.62/2020;

**Waxaan soo-saaray;**

Dhaqan-galka Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-xigeenka Hore, Guddoomiyaha Golaha Guurtida, Guddoomiyaha Golaha Wakiillada ee Hore iyo Mudaneyaasha Baarlamanka, Xeer Lr.62/2020;

Allaa Mahad Leh

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:** | Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:62/2020** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhsanayd **02/12/2020.** |
| **Markuu Arkay:** | Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:62/2020** ee Golaha Guurtida JSL kuna Taariikhsanayd **09/12/2020.** |
| **Markuu Arkay:** | In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ayna ku sameyn kuna ansixiyeen sagaal iyo afartan **(49)** cod Wax-Ka-Bedel Iyo Kaabista Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne Ku Xigeenka Hore, Guddoomiyaha Golaha Guurtida , Guddoomiyaha Golaha Wakiilada Ee Hore Iyo Mudanayaasha Baarlamaanka Xeer Lr **.62/2020** |

# Wuxuu

Cod aqlabiyad ah oo shan iyo labaatan **(25 cod)** oo gacan taag ah ku Ansixiyay Wax-Ka Bedel Iyo Kaabista Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne Ku Xigeenka Hore, Guddoomiyaha Golaha Guurtida , Guddoomiyaha Golaha Wakiilada Ee Hore Iyo Mudanayaasha Baarlamaanka Xeer Lr **.62/2020**

**ALLAA MAHAD LEH**

| | |
|---|---|
| **C/risaaq Siciid Ayaanle** | **Baashe Maxamed Faarax** |
| **Xoghayaha Guud ee G/Wakiilada JSL** | **Guddoomiyaha Golaha Wakiilada JSL.** |

**Go'aanka Wax-ka-Bedel iyo kaabista Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, M/weyne ku-xigeenka hore,Guddoomiyaha Golaha Guurtida , Guddoomiyaha Golaha Wakiilada iyo Mudanayaasha Baarlamaanka Xeer Lr.62/2020**

**Golaha Wakiiladu**

**Markuu Arkay: -** Qodobka 38aad Faqradiis 1aad, Qodobka 47aad, 65aad, 79aad iyo Qodobka 87aad ee Dastuurka JSL.

**Markuu Arkay :-** In Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiiladu ay leeyihiin habmaamuuska 2aad iyo 3aad ee Qaranka sida ku cad Qodobka 93aad ee Dastuurka Dalka

**Markuu ogaaday:-** Kaalinta wax ku-oolka ah ee Madaxweynayaashii iyo Madaxweyne ku xigeenadii hore, iyo Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ee hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanku ka qaataan hanaanka dib-u dhiska Qaranka JSL.

**Markuu tixgeliyay :-** Soo jeedintii Madaxweynaha JSL ee kaabista iyo wax ka bedelka xeerka maamuuska madaxweynaha iyo madaxweyne ku xigeenkii hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanka Xeer Lr. 62/2013.

# GOLAHA WAKIILADA JSL

**Markuu Arkay: -** Qodobka 38aad Faqradii 1aad, Qodobka 47aad, 65aad, 79aad iyo Qodobka 87aad ee Dastuurka JSL.

**Markuu Arkay: -** In Guddoomiyaha Golaha Guurtidu iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiiladu ay leeyihiin habmaamuuska labaad iyo saddexaad ee Qaranka sida ku cad Qodobka 93aad ee Dastuurka Dalka.

**Markuu ogaaday: -** Kaalinta wax ku-oolka ah ee Madaxweynayaashii, Madaxweyne ku xigeenadii hore iyo Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ee Hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanku ka qaataan hanaanka dib-u dhiska Qaranka JSL.

**Marku tixgeliyay: -** Soo jeedintii Madaxweynaha JSL ee kaabista iyo wax ka beddelka Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenkii hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanka Xeer Lr. 62/2013.

## Wuxuu Ansixiyay

Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-xigeenka Hore, Guddoomiyaha Golaha Guurtida, Guddoomiyaha Golaha Wakiillada ee Hore iyo Mudaneyaasha Baarlamanka, Xeer Lr. 62/2020.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA • FAAFINTA RASMIGA AH • OFFICIAL GAZETTE • SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Qodobka 1aad**
**Magaca Xeerka.**

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-xigeenka Hore, Guddoomiyaha Golaha Guurtida, Guddoomiyaha Golaha Wakiillada ee Hore iyo Mudaneyaasha Baarlamanka, Xeer Lr. 62/2020.

**Qodobka 2aad**
**Erey Bixinta.**

**Xeer-dejinta (Baarlamaan): -** waxa loola jeedaa Baarlamaanka JSL oo Ka kooban labada aqal ee kala ah (Golaha Guurtida iyo Golaha Wakiilada)

**Mudane: -** waxaa loo jeedaa xubin ka tirsan Golaha Guurtida ama Golaha Wakiilada jsl.

**Gunno-Sagootis: -** waxa loola jeedaa mushaharka iyo gunnada billaha ah ee wada socda ee mudanayaasha Baarlamaanka.

**Gunno Maamuus: -** waxa loola jeeda qadarka lacagta ah ee la siinayo madaxweyneyaashii iyo Madaxweyne ku-xigeenadii hore iyo Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Golaha wakiilada ee hada jooga iyo kuwa ka danbeeya marka ay xilka ka dagaan.

**Madaxwayneha hore: -** waxa loola jeeda masuul kasta oo xilka madaxwayne ka qabtay Somaliland intay jirtay.

**Madaxweyne ku xigeen hore: -** waxa loola jeeda masuul kasta oo xilka Madaxwayne ku-xigeen
ka qabtay Somaliland intay jirtay.

**Guddoomiyaha Golaha Guurtida hore: -** waxa loola jeeda masuul kasta oo xilka Guddoomiyaha Golaha Guurtida ka haya hada iyo kuwa uga dambeeyaa marka ay xilka wareejiyaan.

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilada hore: -** waxa loola jeeda masuul kasta oo xilka Guddoomiyaha Golaha Wakiilada Qofkastoo xilka Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ka haya hada iyo kuwa uga dambeeya marka ay xilka wareejiyaan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 3aad
## Dhawrsanaanta

Madaxweynaha, Madaxwayne ku-xigeenka, Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ee hore waxay leeyihiin dhawrsananta sharci ee ay leeyihiin mudanayaasha baarlamaanka, waxaana uu ku waayi karaan haddii maxkamad ay ku rido xukun kama danbays ah oo ciqaabtiisu aanay ka yarayn saddex (3) sanadood.

## Qodobka 4aad
## Xuquuqda Hoyga

Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka hore, Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ee hore waxay xaq u leeyihiin:

1. In dawladdu siiso hoy ku habboon oo ah guri dawladeed isla markaana ah kiro bilaash ah (free rent) inta ay nool-yihiin iyaga iyo xaasaskoodu ama ka ugu yar caruurtu uu ka gaadhayo da'da18 jir.
2. In ay dawladdu u dayac tirto hoyga iyadoo la raacayo nidaamka dayactirka guryaha dawladda.
3. Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka hore, Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ee hore Xuquuqda ku xusan Faqrad 1aad ee Qodobkan ma iibinkaraan, ma wareejin wareejin karo, ma hibayn karaan ma kireyn karaan u mana isticmaalikaraan sifo sharci-daro ah.
4. In la siiyo midkiiba hal gaadhi, hal dareewal, Laba shaqaale, 3 ciidan ah oo ilaaliya nabadgalyadooda iyaga iyo guryahoodaba kuwaas oo kharashkooda dawladu bixinayso.

## Qodobka 5aad
## Gunnada Maamuuska.

1. Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka hore, Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ee hore waxay leeyihiin (25% boqolkiiba shan iyo labaatan) mushahar la mid ah ka ku xusan xeerka mushaharka Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka (xeer Lr. 46/2010) iyo xuquuqda ay ku helaan xubin sharafeednimada Golaha Guurtida.
2. Haddii Madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenka hore Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ee hore geeri ku timaado waxay marwooyinkooda iyo caruurtoodu yeelanayaan (12.5% boqolkiiba laba iyo toban iyo badh) mushaharka ku xusan faqrada 1aad ee Qodobkani.
3. Haddii marwada ama marwooyinka madaxweynaha ama Madaxwayne ku-xigeenka hore, Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ee hore ay geeriyi ku timaado waxaa caruurta loo sii wadayaa (12.5% boqolkiiba laba iyo toban iyo badh) mushaharka ku xusan faqrada 1aad ilaa inta ilmaha ugu yari ka gaadhayo 18 sano jir.

## Qodobka 6aad
## Xilliga bilowga Gunnada

1. Waxa Madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenka hore ama Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ee hore gunnada looga bilaabaya marka ay xillka wareejiyaan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH

2. Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ee hore ee inta Xeerkani dhaqan galin xillka ka degay waxa Gunnada looga bilabayaa ka dib marka uu Xeerkani dhaqan galo.

## Qodobka 7aad
## Kharashka caafimaadka

Haddii madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenka hore Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ee hore ay soo food saarto xaalad caafimaad daro oo gudidda dhakhatiirta Qaranku ku taliyaan in cusbitaal dibadeed loo diro, waxaa kharashka caafimaad bixinaya xukuumadda.

## Qodobka 8aad
## Reebanaanta

Xuquuqda uu Xeerkani jideeyey waxa ka reeban in la siiyo Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore ama Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ee hore ee xillka lagaga qaaday maamus ka xayuubinta Dastuuri ah.

## Qodobka 9aad
## Geeridda iyo usameenta aas Qaran

Haddii ay geeri ku timaado Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka hore, Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ee hore waxaa loo samaynayaa aas Qaran.

## Qodobka 10aad
## Hab-Maamuuska Mudaneyaasha Baarlamaanka

1. Mudanayaasha Baarlamaanka looma diidi karo gelida xafiisyada dawladda iyo meel kasta oo ay shaqo qaran ka socoto marka ay gudanayaan xilkooda iyo waajibadkooda dastuuriga ah.

2. Waa waajib in hay'addaha iyo Wasaraddaha Qaranku siiyaan xog-ramsi ah oo run ah Gudi-hosaadyadda Golayaasha iyo Mudanayaasha loo igmado xill-gudasho.

3. Cid kasta oo ka hortimaado xeerkan ama meel kaga dhacda sharafta mudane ama xayirta xilka uu gudanaayo waxaa lagu ciqaabayaa si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Guud ee ah dambiyada laga galo hawl-wadeen Qaran.

4. Waxaa waajib ku ah dhamaan shaqaalaha Dawladda, Ciidamadda Qaranka iyo cidii kale ee hawl qaran looga baahdo inay u fududeeyaan gudashada xilkooda.

## Qodobka 11aad
## Mushaharka iyo Gunnada Sagootiska ah Mudanayaasha Baarlamaanka

1. Mudanayaasha Baarlamaanka ee dhamaysta muddo xilleedka Dastuuriga ah waxa la siinayaa mushahar iyo gunno sagootis ah oo dhan hal Sanno oo mushahar iyo gunno wada socota ah sida ku xusan Madax-xigaha Mushaharka iyo Gunnooyinka Miisaaniyada Qaranka ee labada Gole Baarlamaan ee 2110105 (Mushaharka Xildhibaannada Xeer-Dejinta) iyo 211303 (Gunno-hawleed).



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Mushaharka iyo Gunnada ku xusan faqrada 1[aad] ee Qodobkan waxaa xaq u yeelanaya mudanayaasha baarlamaanka ee muddo xilleedkoodu socdo iyo kuwa ka dambeeya.
3. Mushaharka iyo Gunnada ku xusan faqrada 1[aad] ee Qodobkan Wasaaradda maaliyadu waa inay ku bixisaa saddex bilood gudahood marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada baarlamaanka cusub.

## Qodobka 12[aad]
## Daryeelka Caafimaadka Mudanayaasha Baarlamaanka

Mudanayaasha Baarlamaanku waxay xaq u leeyihiin inay helaan xanaano caafimaad oo la mid ah ta ku xusan Qodobka 7[aad] ee Xeerkan.

## Qodobka 13[aad]
## Adeegsiga Xeerka

Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenadda hore Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ee hore iyo Mudanayaasha baarlamaanka ee maanta fadhiya iyo kuwa ka danbeeya.

## Qodobka 14[aad]
## Tir-tiridda

Waxaa la tir-tiray Wax Ka-beddelka Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka Hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanka ee Xeer Lr. 62/2013, ama Qodobkasta oo ka hor imanayaa xeerkan, laguna jideeyey xuquuqda Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanka.

## Qodobka 15[aad]
## Dhaqan-galka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka labada Gole ee Xeer dejintu ansixiyaan madaxweynuhuna saxeexo faafinta rasmiga ahna ku soo saaro.

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL

______________________________

Baashe Maxamed Faarax
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

______________________________



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE